Oregon Health Authority
QAYBTA CAAFIMAADKA

Su’aalaha Aalaaba la Iska Weydiiyo Hagida Dib u furida

Ururada Jidh-dhiska ka Shaqaysta *(la cusboonaysiiyey 09/16/2020)*

Hoos waxaa ku yaalo jawaabaha su'aalaha badanaa la isweydiiyo ee ku saabsan Hagida Dib u Furida Marxalada Koowaad ee Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA): Hagida Gaarka u ah Shirkadaha Jirdhiska ka shaqaysto (Hagida dib u furida jidh-dhiska). OHA waxay bixisaa FAQ-yadaan si ay uga caawiso bulshada inay fahamto hagida, si ay uga jawaabaan su’aalaha daneeyeyaasha, iyo si ay u xaqiijiyaan sida hagida u quseyn karto dhacdooyinka gaarka ah. Su’aalahaan Aalaaba la Iswaydiiyo (FAQ-yada) waxaa la cusbooneysiin karaa muddo kadib. Su’aalaha Aalaaba la Iswaydiiyo (FAQ-yada) looguma talagelin inay buuxiyaan booska hagista, laakiin waxaa loogu talagalay inay fasiraan, kaabaan, oo ka bixiyaan faahfaahino hagista.

S1: Maxay tahay in xarumaha fanka isdifaaca ay sameeyaan si dib loogu furo?

J1: Xarumaha fanka isdifaacu waxay ku furmi karaan hagidan hadiiba barnaamijyadu la baddelo si loo mamnuuco istaabashada jireed ee dhammaystiran sida xuurtada iyo lagdinta. Jeermiska ka dil buushashka iyo qalabka isticmaal kasta kadib, si joogta ahna u jeermisdil una nadiifi aagaga shaqada, aagaga dadku ku badan yihiin, iyo sagxadaha badanaa la taabto ee aagagga ay isticmaali karaan shaqaalaha iyo bulshada. Sidoo kale, fasaladu waa inay ku xadidan yihiin tiro suurtogalinaysa ugu yaraan lix (6) fuud inay isku jiraan dadku ku jira qolka.

S2: Waa maxay qawaaniinta xarumaha jidh-dhiska ee loogu talagalay barkadaha, oo ay kujiraan tabobarka badmaaxa, fasalada jidh-dhiska biyaha iyo casharrada dabbaasha?

J2: Barkadaha dabbaasha ee liisanka haysta ee doorta inay furnaadaan waxa khasab ah inay raacaan Hagitaanka OHA ee Marxaladda Koowaad iyo Marxaladda Labaad ee Barkadaha iyo Garoomada Taniska.

S3: Miyuu Hagida OHA ee Ururada Jidh-dhiska ka Shaqaysta qabanayaa/khuseeyaa ururada bixiyo qoob-ka-ciyaarka labada qof uu?

J3: Haa.

S5: Miyaa barkadaha dabiibka ee ku yaalo xarumaha jidh-dhiska/jiimyada la oggol yahay in la furo?

J5: Haa, hase yeeshee, ururada ka shaqaysta jidh-dhiska waxa looga baahan yahay inay xiraan qolalka uumiga qallalan iyo uumiga qoyan.

S6: Miyaa garoomada taniska ee ku yaala gudaha goobta ururada jidh-dhiska ka shaqaysta la oggol yahay in la furo?

J6: Haa. Ururada jidh-dhiska ka shaqaysta waxay oggolaan karaan isticmaalka garoomada taniska ee ku yaalo xarumahooga. Ciyaaryahanadu waa inay u hoggaansamaan Hagitaanka Gobolka oo dhan ee Maaskarada, Gashaanka Wajiga iyo Waji Daboolka.

S7: Miyey barkadda isticmaalka xadidan u furan tahay ururka mulkiilaha gurigayaga?

J7: Haa, barkadda waa loo oggol yahay inay furnaato iyadoo raacaysa Hagitaanka Barkadaha iyo Garoomada Ciyaarta Taniska.

S8: Miyaa qoob-ka-ciyaarka lammaan la oggol yahay haddii dadku la ciyaarayaan kaliya xubnaha kooxdooda, ciyaaraan iyagoo lix (6) fuudh u jira lammaanaha kale, ay xiran yihiin maaskaro ayna raacayaan dhammaan tilmaamaha kale ee la xiriira ururada jidh-dhiska ka shaqaysta?

J8: Haa. Haddii kuwa qoob-ka-ciyaarka wada ciyaarayaa ay yihiin isku koox, way u bannaan tahay wada ciyaaristu. Waa inay sii wadaan joogteynta inay lix (6) ka fogaadaan dadka kale ee qolka kujira ayna raacaan dhammaan shuruudaha kale ee ururada jidh-dhiska ka shaqaysta.

S9: Haddii xarunta jimicsiga ee 24-ka saac furan ayna shaqaale helayn 24 saac maalin kasta, tani miyay ka dhigan tahay inaanu kaliya u oggolaan karno xubnaha inay isticmaalaan xarunta marka shaqaale shaqaynaya ay joogaan?

J9: Haa. Xarunta waxa waajib ah in shaqaale joogaan. Ururada jidh-dhiska ka shaqaysta waxa waajib ku ah inay haystaan shaqaale la socda kala fogaanshaha dadka iyo shuruudaha jeermis dilidda. Ururada jidh-dhiska ka shaqaysta waxa waajib ku ah inay shaqaalaha ama martida xarunta ku laasimaan inay masaxaan dhammaan qalabka (tusaale ahaan, balooniyada, culeysyada, mashiinada, iwm.) isla markaasba ka hor ama kadib isticmaal kasta iyagoo isticmaalaya jeermisdilaha ay siisay xarunta jidh-dhisku kaasi oo kujira badeecooyinka ay ansixiyeen EPA ee loogu talogalay fayraska SARS-CoV-2 ee sababa COVID-19. Milan boqolkiiba 60%-95% ka kooban aalkolo ayaa sidoo kale la aqbali karaa. Ururada jidh-dhiska ka shaqaysta waxa looga baahan yahay inay diiwaangaliyaan oo hayaan: macluumaadka xiriirka macmiilka iyo taariikhda iyo wakhtiga macmiilku xarunta isticmaalay. Haddii ay jiraan dad laga helay COVID-19 oo la xiriiro xarunta, saraakiisha caafimaadka bulshada waxay u baahanayaan in ganacsigu bixiyo macluumaadkan si loo sameeyo dabagalka cudurka. In loo baahdo mooyee, warbixintaan waxaa la baabi'in karaa 60 maalmood kadib laga bilaabo taariiqda kulanka.

S10: Sidee ayey xarumaha jimicsigu u baddali karaan habraacyada aqbalida dadka imanaya si ay meesha uga saaraan istaabashada?

J10: Halkan waxaa ah qaabab qaar ee caawin doona yaraynta istaabashada shaqaalaha
iyo macaamiisha:

- Isticmaal muraayadaha qoqobka ama xayndaab kale si aad ugu dhaxaysiiso shaqaalaha iyo macaamiisha.
- Ka fogee mashiinka lacag-bixinta elektarooniga ah ama akhriyaha kaarka xubinimada miiska shaqaalaha soo dhawaynta.
- Dadka ku sii gacmo nadiifiye aakulo ku salaysan (60-95%) albaabka hore ama miiska soo dhawaynta.

S12: Miyuu jiraa hagid gaar ah oo fasalada qoob-ka-ciyaarka dhalintu ay raacayaan oo ka duwan fasalada qoob-ka-ciyaarka dadka waawayn?

J12: Haa, fasalada qoob-ka-ciyaarka dhalintu waa inay raacaan Hagitaanka Ciyaaraha Madadaalo ee Gobolka oo Dhan ee OHA, oo qoob-ka-ciyaarka dadka waawaynna waa inay raacaan Hagitaanka Gaarka ah ee Ururada Jidh-dhiska ka shaqaysta.

S13: Miyey tahay in macallimiinta kooxda jidh-dhisku ay xirtaan daboolka wajiga?

J13: Haa, barayaasha jidh-dhiska kooxdu waxa waajib ku ah inay raacaan Hagtiaanka Gobolka oo Dhan ee Maaskarada, Waji Daboolka, Gaashaanka Wajiga. Barayaasha kooxda jidh-dhiska iyo kaqaybgalayaasha fasalku waxa waajib ku ah inay xirtaan maaskarooyin, gaashaanada wajiga, ama waji daboolo inta ay gudaha joogaan. Inta ay dibadda joogaan, barayaasha jidh-dhiska waxa ku waajib ah inay xirtaan maaskarooyin, gaashaanada wajiga, ama waji daboolo had iyo jeer. Kaqaybgalayaasha fasalka waxa ku waajib ah inay xirtaan maaskarooyin, gaashaanada wajiga, ama waji daboolo haddii aan kala fogaansho 6 fuud ah oo u dhaxayso kaqaybgalayaasha la joogtayn karin had iyo jeer.

Helitaanka dukumiintiga: Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacada balaaran, ama farta indhoolayaasha. Haddii aad u baahan tahay caawimaad ama aad su'aalo qabtid, fadlan kala xiriir Mavel Morales lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama OHA.ADAModifications@dhsoha.state.or.us.